

# Tubta Washington ee Adeegyada Soo Kabashada Waxbarashada Gaarka ah: 2021 & Wixii ka dambeeya

Ujeedada macluumaadkan ayaa ah in laga caawiyo kooxaha Barnaamijka Waxbarashada Gaarka ah (Individualized Education Program, IEP) go'aaminta adeegyada soo kabashada<sup>1</sup> looga baahan yahay ardayda naafada ah oo ay saamaysay COVID-19 oo ay u dheertahay hagitaanka waxbarashada guud ee Xafiiska Kormeeraha Guud ee Waxbarashada Dadweynaha (Office of Superintendent of Public Instruction, OSPI). Cudurka safmarka awgiis, arday kasta oo Washington jooga wuxuu la kulmay carqalad aan horay loo arag oo ku timid waxbarashada la soo xaadirayo. Arday badan ma aysan sameynin horumar ku habboon<sup>2</sup> yoolalka IEP ee COVID ka hor sababo la xiriira xiritaanka xarunta dugsiga, adeegyada seegay ama daahay, ama caqabadaha helitaanka barashada fog, in kasta oo ay jiraan dadaallada degmooyinka, barayaasha, qoysaska, iyo ardayda.

Filashada OSPI, oo waafaqsan baahida loo qabo in la bixiyo waxbarasho bilaash ah oo ku habboon dadweynaha (Free Appropriate Public Education, FAPE), ayaa ah in kooxaha IEP ay tixgeliyaan baahida shaqsiyeed ee adeegyada ka soo kabashada ee arday kasta oo leh IEP laga bilaabo dugsiga barbaarinta illaa da'da 21.

**Qoysasku maahan inay dalbadaan codsi gaar ah oo ku saabsan nidaamkan inuu dhaco.** Kooxaha IEP waa inay dib u eegaan baahida loo qabo adeegyada soo kabashada oo qayb ka ah geeddi-socodka IEP isla markaana mudnaanta siiyaan go'aannada shaqsiyeed iyadoo lagu saleynayo baahida ardayga. Si loo cadeeyo, OSPI uma baahna degmooyinku inay si deg deg ah jadwal ugu sameeyaan oo ay ugu qabtaan shirarka IEP arday kasta oo leh IEP. Go'aamadaan waxaa laga yaabaa inay u baahdaan inay dhacaan ka hor bilowga sanad dugsiiyeedka 2021-22, ka hor taariikhda sannadlaha ah ee dib u eegista IEP, ama waxay dhici karaan taariikhda dib u eegista sanadlaha ah ee soo socota haddii degmada iyo waalidku oggolaadaan. Kooxo badan oo IEP ah ayaa ka qayb qaadanayay wada hadaladaan sanad dugsiiyeedkii 2020-21 waxayna bilaabeen hirgalinta habab lagu go'aaminayo laguna bixinayo adeegyada soo kabashada shakhsiyadeed.

Ka qeybgalka agaasimaha waxbarashada khaaska ah ee degmadu waxay lagama maarmaan u tahay horumarka iyo hirgelinta Qorshaha Fayo-qabka Ardayda iyo Waxbarashada ee degmada, oo ay ugu wacan tahay OSPI ugu dambayn Juun 1, 2021. Tilmaantaan dheeriga ah waxay siisaa macluumaad dheeri ah oo gaar u ah howlaha kabashada ee ardayda leh IEP mana bedeleyso shuruudahaas. Tilmaantaan waxaa laga soo qaatay ilo kala duwan, oo ay ku jiraan hagitaankii hore ee OSPI, iyo ilaha kale ee gobolka, federaalka, iyo ilaha caawimaada farsamada. Tixraacyada OSPI ee Waxbarashada Gaarka ah Su'aalaha iyo Jawaabaha waxaa lagu dhex xusay qows. Waxyaabaha ku jira dukumintigan ayaa ah:

- [Ahmiyadaha Adeegyada Soo Kabashada](#)
- [Qeexida Adeegyada Soo Kabashada](#)
- [Go'aaminta Adeegyada Soo Kabashada](#)
- [Diiwaangelinta Adeegyada Soo kabashada](#)
- [Macluumaad Dheeraad ah oo lagu Taageerayo Adeegyada Soo kabashada](#)
- [Lifaaqa: Korjoogteynta Horumarka \(waa Furaha!\)](#)


<sup>1</sup> Adeegyada Soo kabashada waa erey ay OSPI u adeegsato inay ku sifeeyaan adeegyo dheeri ah oo la siiyo ardayda naafada ah si wax looga qabto saameynta socota ee cudurka safmarka ah ee COVID-19 iyo xirnaanshaha xarumaha dugsiyada ee sanad dugsiiyeedka xagaaga 2020. (Fiiri Lifaaqa)

<sup>2</sup> Ardayda u qalma waxbarashada gaarka ah, IDEA waxay u baahantahay degmooyinku dugsiga inay ardayda siiso waxbarasho dadwayne oo bilaash ah oo haboon (FAPE) iyadoo la siinayo arday kasta oo u qalma oo leh IEP loogu talagalay in lagu daboolo baahiyaha gaarka ah ee ardayga kaas oo "si macquul ah loo xisaabinayo si loogu suurto galiyo canugga inuu ka dhigo mid ku habboon horumarka iyadoo la fiirinayo duruufaha ilmaha." 20 U.S.C. 1412(a)(1); *Andrew F. v. Douglas County School District RE-1* 137 S.Ct. 988, 69 IDELR 174 (2017).



## Ahmiyadaha Adeegyada Soo Kabashada

Arday kasta oo leh IEP uma baahna adeegyo soo kabasho, adeegyada dib u soo kabashadana daruuri uma aha inta u dhiganta waqtiga la seegay (tusaale, daqiiqad daqiiqad, saac saacad). Adeegyada dib u soo kabashada waa inay diirada saaraan ka caawinta ardayga inuu gaaro heerka horumarka ee yoolalka IEP ee la filayey haddii uusan cudurka safmarka ah dilaacin. **Adeegyadan waa inaysan ku saleysneyn boqolkiiba ama xisaabin qaacido; waqtiga iyo xaddiga adeegyada soo kabashada waa inay go'aan shaqsiyeed u ahaadaan arday kasta oo leh IEP.**



Waalidiinta iyo qoysaska waa iskaashatooyin muhiim u ah si loo ogaado baahida loo qabo adeegyada soo kabashada, maadaama ay guud ahaan hayaan macluumaadka waqtigan ee ku saabsan ardayga laga soo bilaabo wakhtiga iskuulka la xiray iyo illaa iyo hadda. Sida dhammaan hababka waxbarashada gaarka ah, degmo dugsiyeedyadu waa inay bixiyaan taageero luqadeed, oo ay ku jiraan tarjumaadda sida loogu baahan yahay, si loogu taageero go'aannada ku saabsan adeegyada soo kabashada.<sup>3</sup> Degmo dugsiyeedyadu waa inay hubiyaan inay waaliddiintu hayaan macluumaadka iyo taageerooyinka lagama maarmaanka u ah ka qaybgalka hannaanka go'aan qaadashada.

## Qeexida Adeegyada Soo Kabashada

**Adeegyada Soo Kabashada:**<sup>4</sup> Ereygan waxaa adeegsada OSPI si ay u sharaxdo waxbarashada gaarka ah iyo adeegyada la xiriira iyo taakuleynta la siiyo ardayda naafada ah si wax looga qabto saameynta joogtada ah ee cudurka COVID-19 iyo xirnaanshaha xarumaha dugsiya ee guga 2020. Adeegyada soo kabashada, oo ay ku jiri karaan adeegyo magdhow ah, waxay siinayaan waxbarasho gaar ah oo dheeraad ah iyo adeegyo la xiriira ardayda naafada ah waxaana loogu talagalay inay wax ka qabato horumar ku habboon la'aanta ee yoolalka IEP, sababo la xiriira waayintaanka ama xaddidnaanta waxbarashada gaarka ah iyo adeegyada la xiriira ama sababo kale awgood oo ka dhashay cudurka safmarka ah.<sup>5</sup> **Muhiimad ahaan, go'aamada adeegyada soo kabashada ma ahan natijada khilaaf, laakiin waa inay noqdaan jawaab wada shaqeyn ah oo bixiyaan kooxda IEP.**

<sup>3</sup> [Koodka Maamulka Washington \(Washington Administrative Code, WAC\) 392-172A-03100](#) iyo [WAC 392-172A-05001](#)

<sup>4</sup> Adeegsiga ereyga "adeegyada soo kabashada" ee dukumintigan looguma talagalay in laga takhaluso ama la yareeyo waajibbaadka ah in la bixiyo waxbarasho magdhow ah oo loogu talagalay adeegyada waxbarashada gaarka ah ee la diiday ama aan la heli karin intii lagu jiray xiritaanka xarunta dugsiya. Adeegyada magdhowga ah wali waa lagu dalban karaa in la helo xadgudub iyada oo loo marayo hababka xallinta khilaafaadka waxbarashada gaarka ah.

<sup>5</sup> Degmooyinka waa inay sidoo kale tixgeliyaan haddii ardayda heleysa adeegyada soo kabashada ay u baahan yihiin adeegyo kale oo la siiyo dhammaan ardayda si loo yareeyo saameynta COVID-19, oo ay ku jiraan kuwa wax looga qabanayo luminta waxbaridda ee goobta guud ee waxbarashada iyo in la taageero guud ahaan fayooabaanta ardayda.

- Ma jiro wax shuruud ah oo ah in adeegyada soo kabashada lagu bixiyo isla qaddarkii la seegay (ie, daqiiqad daqiiqad, saacad saacad). (S&J B-1, B-4)
- Ardayda badankood ee leh IEP, OSPI waxay ku talineysaa in guud ahaan adeegyada soo kabashada la bixiyo waqti ka baxsan maalinta iskuulka, oo ay ku jiri karaan adeegyo inta lagu jiro xagaaga. Haddii kooxda IEP ay go'aamiso in adeegyada soo kabashada la bixin doono inta lagu jiro maalinta iskuulka, kooxuhu waa inay hubiyaan in taasi aysan u horseedin meeleyn ardayda u xaddidan ama ay gacan ka geysato in la seego waxbarashada guud oo dheeri ah. (Faallada S&J, S&J B-1, B-4)
- Tusaalooyinka sida adeegyada soo kabashada lagu bixin karo waqti ka baxsan maalinta iskuulka waxaa ka mid ah laakiin aan ku xaddidnayn:
  - Waxbarasho la soo xaadirayo oo dheeraad ah ka hor ama ka dib dugsiga.
  - Adeegyo toos ah ama ku daawaynta dhanka khadka (tusaale ahaan, Daaweynta Hadalka iyo Luqadda, Daaweynta Shaqada, Daaweynta Jirka,) ka hor ama ka dib dugsiga ama inta lagu jiro fasaxyada dugsiga.
  - Adeegyada kala guurka oo dheeri ah ka hor ama ka dib dugsiga ama xilliyada fasaxyada dugsiga.
  - Adeegyo dhanka fogaanta ah oo dheeraad ah (aan isku mar dhicin/isku mar dhaca) ka hor ama ka dib dugsiga ama xilliyada nasashada dugsiga, haddii ardaygu muujiyey horumar ku filan dhanka adeegyada lagu bixiyay dhanka khadka.
  - Adeegyada waxbarashada gaarka ah ee dheeriga ah inta lagu jiro fasaxyada iskuulka (sida, xagaaga, jiilaalka, guga).
  - Adeegyada waxbarashada gaarka ah ee dheeri ah maalmaha sii deynta degmada.
  - Kooxo ciyaareed toos ah oo dheeri ah ama kooxo bulsheedka asxaabta ka hor ama kadib dugsiga ama xilliyada nasashada dugsiga.

**Adeegyada/Waxbarashada Magdhowga ah** Degmooyinka iyo waalidiinta ayaa laga yaabaa inay si fiican u yaqaanaan erayga waxbarashada magdhawga ah, taas oo ah daaweyn loo siman yahay oo aan si gaar ah loogu qeexin Sharciga Waxbarashada Dadka Naafada ah (Individuals with Disabilities Education Act, IDEA). Waxbarashada magdhowga ah ayay maxkamaduhu ku qeexeen inay yihiin adeegyo hagaajinaya diidmada FAPE. Ujeedada adeegyada waxbarashada magdhawga ah ayaa ah in lagu saxo awood la'aanta degmadu inay siiso ardayga adeegyada waxbarashada gaarka ah ee ku habboon inta lagu jiro waqtiga ardaygu xaq u leeyahay ama u lahaa FAPE.<sup>6</sup> Abaalmarinta adeegyada magdhowga ah ayaa la doonayaa in lagu meeleeyo ardayga booskii ay ku jiri lahaayeen, haddii ardayga aan laga qaadin waxbarashada gaarka ah iyo adeegyada la xiriira. Waxbarashada magdhowga ah waxaa loogu talagalay in lagu hubiyo in ardaygu si habboon wax loogu baray macnaha IDEA sidaas darteedna, guud ahaan, ma jiraan wax shuruud ah oo ku xira i la bixiyo maalin maalin ama daqiiqad daqiiqad u dhigma magdhowga waqtigii la seegay.<sup>7</sup>

- In kasta oo inta badan lala xiriiriyo cabasho gobol oo qoran ama go'aanka nidaamka xuquuq dhowrista leh, bixinta waxbarashada magdhowgu uma baahna in cillad laga helo dhinaca degmada; taa badalkeed, waxbarashada magdhowga ah waxay wax ka qabataa *awood la'aanta* bixinta FAPE marka lagu daro *ku guuldaraysiga* bixinta FAPE.<sup>8</sup> Haddii kooxda IEP ay go'aamiso in luminta ama la'aanta helitaanka adeegyada waxbarashada gaarka ah ay ugu wacan tahay socoshada COVID-19 iyo xirnaanshaha xarunta xilliga guga ee 2020 waxay dhalisay in ardaygu uusan sameynin horumar laga filayo himilooyinka IEP, kooxda IEP waa inay tixgeliyaan waxa adeegyada waxbarashada magdhowga ah ee ardaygu u baahan yahay. OSPI waxay adeegsanaysaa erayga adeegyo magdhow si ay u sheegto

<sup>6</sup> Warqad ku socota Lipsitt, OSEP (Aabriil 2018) (Letter to Lipsitt, OSEP (April 2018).

<sup>7</sup> *Waalidiinta Ardayga W. v. Degmo Dugsiyeedka Puyallup ee Lambr 3*, 31 F.3d 1489 (9ka Cir. 1994). (*Parents of Student W. v. Puyallup School District No. 3*, 31 F.3d 1489 (9th Cir. 1994).

<sup>8</sup> Waaxda Waxbarashada Mareykanka. (2020). [Xaashida Xaqiiqda Dheeraadka ah: Wax ka qabashada Khatarta COVID-19 ee Dugsiyada Barbaarinta, Dugsiyada Hoose iyo Sare intay u adeegayaan Carruurta Naafada ah.](#) "Meesha, iyadoo ay sabab u tahay cudurka safmarka ee caalamiga ah awgiis iyo xirnaanshaha iskuulada awgeed, ay dib u dhac lama huraan ah ku yimid bixinta adeegyada—ama xitaa sameynta go'aano ku saabsan sida loo bixiyo adeegyada—Kooxaha IEP waa inay gaaraan go'aan shaqsiyeed haddii iyo ilaa iyo heerka adeegyada magdhowgu noqon karaan kuwa loo baahan yahay markay dugsiyadu dib u bilaabaan howlahoodii caadiga ahaa."

nooca adeegyada soo kabashada ee la bixiyay si loo daweyo awood la'aanta ama ka gaabinta bixinta FAPE inta lagu jiro xilliga cudurka faafa.

- Waaxda Waxbarashada ee Maraynkanka (Department of Education) waxay tilmaamtay in marka dib loo furo iskuulka, kooxaha IEP ay bilaabi karaan oo ayna tahay inay bilaabaan go'aaminta shaqsiyeed ee ku saabsan in ardayda leh IEP ay u baahan yihiin adeegyo magdhow si loo xalliyo yaraanta FAPE ee ay sababtay la'aanta adeegyada waxbarashada gaarka ah sababo la xiriira cudurka faafa ee COVID-19 iyo xiritaanka xarunta dugsiga ee 2020.<sup>9</sup> Inta lagu jiro xirnaanshaha iskuulka ee xilliga COVID, ardayga ma heli karo FAPE sababo la xiriira daahitaanka bixinta adeegyada waxbarashada gaarka ah, degmadu inay ku guuldareysato inay bixiso adeegyo, ama haddii baahida ardayga ay aad u adagtahay iyo, sida oo kale, adeegyadu ma awoodi karin si macquul ah loogu bixiyo iyada oo loo marayo bog waxbarasho oo dhanka khadka ah ama qaabab kale.
- Qaddarka iyo nooca waxbarashada magdhowga ah ee la bixiyay waa inay ahaato mid shaqsi ahaaneed si loo daboolo baahiyaha gaarka ah ee ardayga oo si macquul ah loo xisaabiyo si loo bixiyo dheefaha waxbarasho ee ardaygu ka heli lahaa adeegyada waxbarashada gaarka ah ee degmadu ay ahayd inay ku bixiso marka hore.<sup>10</sup>

## Go'aaminta Adeegyada Soo Kabashada

Go'aannada la xiriira adeegyada soo kabashada waxay diiradda saaraan waxa laga filayo horumarka ardaygu yeelan lahaa haddii uusan cudurkan dilaacin, marka loo eego heerarka hadda iyo horumarka uu ardaygu ku sugan yahay. In kasta oo xogta horumarka laga tixgelinayo qorshooyinka waxbarasho ee joogtada ah (Continuous Learning Plans, CLP) iyo wixii adeegyo ah oo si ku meel gaar ah loo yareeyo inta lagu jiro ama laga soo bilaabo xilliga guga ee xiritaanka xarunta dugsiga 2020, kooxaha IEP waxay go'aamiyaan baahida loo qabo adeegyada soo kabashada iyadoo lagu saleynayo horumarka laga filayay ardayga laga soo bilaabo IEP-ga kah hor COVID.<sup>11</sup> Wax ka beddelka ku meelgaarka ah ee IEP iyo adeegyada saameynta ku yeeshay iyadoo ay sabab u tahay cudurka safmarka ah waa inaysan noqon tixgelinta koowaad ee adeegyada soo kabashada.

Waalidiinta iyo qoysaska waa iskaashatooyin muhiim u ah si loo ogaado baahida loo qabo adeegyada soo kabashada, maadaama ay hayaan macluumaadka waqtigan ee ku saabsan ardayga laga soo bilaabo wakhtiga iskuulka la xiray iyo illaa iyo hadda. Sida dhammaan hababka waxbarashada gaarka ah, degmo dugsiiyeedyadu waa inay bixiyaan taageero luqadeed, oo ay ku jiraan tarjumaadda isida loogu baahan yahay.<sup>12</sup> Degmo dugsiiyeedyadu waa inay sidoo kale hubiyaan inay waaliddiintu hayaan macluumaadka iyo taageerooyinka lagama maarmaanka u ah ka qaybgalka hannaanka go'aan qaadashada.

---

<sup>9</sup> Waaxda Waxbarashada Mareykanka. (2020). [Su'aalo iyo Jawaabo ku saabsan Adeeg u fidinta Caruurta Naafada ah Inta uu Jiro Cudurka Karonafayras ee Dillcay 2019](#) iyo.

<sup>10</sup> *Reid v. District of Columbia*, 401 F.3d 516, 534 (D.C. Cir. 2005).

<sup>11</sup> Kooxda IEP waa inay gaaraan go'aan shaqsi ahaaneed oo ku saabsan haddii ardaygu u baahan yahay adeegyada soo kabashada, iyada oo loo marayo dib u eegista horumarka himilooyinka IEP ka hor COVID, inta lagu jiro xirnaanshaha xarunta COVID, iyo tan iyo dib u bilaabidda waxbarashada tooska ah. (S&J B-1)

<sup>12</sup> [WAC 392-172A-03100](#) iyo [WAC 392-172A-05001](#)

## Shaxda Qulqulka Go'aanka Adeegyada Soo Kabashada

Go'aannada ku saabsan adeegyada soo kabashada waxay diiradda saaraan waxa laga filayo horumarka ardayga, haddii cudurku uusan dhici lahayn, marka la barbar dhigo heerarka hadda ee ardayga, horumarka, iyo helitaanka waxbarashada gaarka ah iyo adeegyada la xiriira.<sup>13</sup>

	Heerarka Jira	Horumar	Adeegyada
<b>COVID Ka hor (Xadka)</b>	<i>Maxay ahaayeen heerarka waxqabadka ardayga ee jiray kahor COVID?</i>	<i>Muxuu ahaa heerka horumarka ardaygu (ee yoolalka IEP) kahor COVID?</i>	<i>Waa maxay waxbarashada gaarka ah iyo adeegyada la xiriira ee laga diiwaangeliyey barnaamijka IEP-ga ardayga ee COVID ka hor?</i>
<b>Laga bilaabo Xilliga Guga 2020 illaa Hadda</b>	<i>Maxay walaacyo ka muujiyeen waalidiinta? Waa maxay farqiga u dhaxeeya heerarka waxqabadka hada ee ardayga, marka la barbardhigo heerka waxqabadka ee laga fili lahaa ardayga haddii uusan cudurku dilaacin?</i>	<i>Ilaa heer intee laeg ayaa heerka ardayga ee horumarka (ee yoolalka IEP) uu hoos u dhacay ama gaabis ku yimid marka loo eego heerarka aasaasiga ah?</i>	<i>Waa maxay waxbarashada gaarka ah iyo adeegyada la xiriira ee la siiyay ardayga Guga 2020 iyo inta lagu guda jiray sanad dugsiyeedka 2020-21 marka loo barbardhigo bixinta xadka ah ee FAPE? Heer intee la eg ayuu ardaygu ka helay adeegyadii la bixiyay guga 2020 iyo inta lagu jiro sanad dugsiyeedka 2020-21?</i>
<b>Go'aanka Adeegyada Soo Kabashada</b>	<i>Sidee iyo goorma ayuu ardaygu heli doonaa adeegyada soo kabashada? Maxay yihiin ikhtiyaarada la heli karo ee loogu talagalay helitaanka loo dhan yahay, haddii adeegyada soo kabashada la bixiyo inta lagu jiro ama ka baxsan maalinta dugsiiga?</i>	<i>Iyada oo ku saleysan heerka horumarka ardayga ee hadda, da'da, iyo heerka koritaankiisa, waa maxay jadwalka loogu talagalay ardaygu inuu ku gaaro heerka laga filayo horumarka ee meelaha adeegyada kabashada ee la tilmaamay? Sidee iyo intee jeer ayaa waalidiinta lagu wargalin doonaa horumarka laga gaarayo adeegyada soo kabashada, oo ay ku jirto sida kooxda IEP ay wax uga qaban doonaan la'aanta horumar macquul ah?</i>	<i>Iyada oo ku saleysan heerarka hadda ee waxqabadka ardayga iyo adeegyada la seegay ama la dhimay inta lagu jiro xilliga cufurka safmarka ah, waa maxay waxbarashada gaarka ah ama meelaha adeegga la xiriira ama yoolalka IEP ee u baahan adeegyada soo kabashada? Meelaha adeegyada soo kabashada ee la tilmaamay, xaddiga adeeg ee loo baahan yahay si looga caawiyo ardayga inuu gaaro heerka horumarka laga filayo haddii uusan cudurku dhicin?</i>

<sup>13</sup> FIIRO GAAR AH: In kasta oo xogta horumarka laga tixgelinayo qorshooyinka waxbarasho ee joogtada ah (Continuous Learning Plans, CLP) iyo wixii adeegyo ah ee si ku meel gaar ah loo yareeyo inta lagu jiro ama laga bilaabo xiritaanka xarunta dugsiiga ee xilliga guga 2020, kooxaha IEP waa inay go'aamiyaan baahida loo qabo adeegyada iyadoo lagu saleynayo horumarka laga filayey ardayga laga soo bilaabo IEP-ga ardayga ka hor COVID (xadka).



## Diiwaangelinta Adeegyada Soo kabashada

Adeegyada dib u soo kabashada, sida waxbarashada magdhowga ah, waxay la xiriiraan bixinta FAPE ee ardayda waxaana lagu diiwaan geliyaa ogeysiis hore oo qoraal ah (Prior Written Notice, PWN) maaddaama PWN ay diiwaangelineyso tallaabada kooxda IEP ay soo jeedisay ee la xiriirta bixinta FAPE ee ardayga (S&J B- 5). Sababtoo ah adeegyada ka soo kabashada waxay u badan tahay in la bixiyo waqti ka baxsan maalinta iskuulka, haddii aysan si kale u go'aamin kooxda IEP, kooxdu waa inay tani ku diiwaangelisaa gudaha PWN si ay u caddeeyso in adeegyadu aysan saameyn ku yeelan doonin deegaanka ugu xaddidnaanta yar ardayda (Least Restrictive Environment, LRE).

Xaaladaha aan caadiga ahayn ee adeegyada soo kabashada ayaa la bixin doono inta lagu jiro maalinta dugsiga, adeegyada soo kabashada waa in lagu aqoonsadaa oo si cad loogu calaamadeeyaa IEP-ga ardayga, oo ay ku jiraan inta jeer, goobta, iyo muddada adeegyada soo kabashada. Mar kasta oo isbaddal lagu sameeyo IEP, kooxdu waa inay dhammaystiraan wax ka beddelka IEP oo ay soo saaraan PWN.

PWN cad oo dhameystiran ayaa ah dukumiinti muhiim ah oo ku saabsan go'aanka kooxda IEP ee ku saabsan adeegyada soo kabashada. Go'aanka kooxda IEP ee ku saabsan adeegyada soo kabashada waa in lagu diiwaangeliyaa PWN oo ay ku jiraan:

- **Tallaabo La Soo Jeediyay:** Sharax adeegyada soo kabashada ee kooxda IEP ay go'aamisay in ardaygu u baahan yahay (ama qor go'aan dukumiinti ah in ardaygu aanu u baahnayn adeegyada soo kabashada). Tani waa inay ku jirtaa waqtiyada (taariikhda bilawga iyo dhamaadka howlaha), jadwalka (inta jeer, mudada, goobta), meelaha adeega (oo ay ku jiraan yoolalka gaarka ah ee la bartilmaameedsanayo), iyo tixgalinta la socodka horumarka, iyo LRE.
- **Sharaxaad:** Si cad u sharax waxqabadka ardayga ee yoolalka IEP. Sharax sababta adeegyada dib u soo kabashada ay muhiim ugu yihiin (ama aan loogu baahnayn) FAPE iyadoo la tixgelinayo daahitaanka adeegyada oo uu sababay cudurka COVID-19. Kooxda waa inay aqoonsadaan caqliga ka dambeeya bixinta ama diidmada adeegyada soo kabashada.
- **Xogta / Macluumaadka la Tixgeliyey:** Warbixinta horumarka, ardayda ka qaybgalaysa waxbarashada dhanka khadka, qiimeynta jaangooyada, indha indheynta macallimiinta, qiimeynta, darajooyinka, yoolalka IEP, dhammaystirka shaqada, qiimeynta qaabeynta, qiimeynta qaybaha, akhrinta aan rasmiga ahayn iyo agabyada xisaabaadka, waalidka iyo ardayga talooyinkooda, iwm.
- **Ikhtiyaarrada Kale Ayaa La Tixgeliyey:** Haddii adeegyada dib u soo kabashada la bixiyo, xulashooyinka kale ee la tixgeliyay ma noqon karaan adeegyo soo kabasho. Bixi aragti macquul ah oo ku saabsan sababta ikhtiyaarkan loo diiday—tusaale ahaan, xogta ardayda waxay taageertay baahida adeegyada soo kabashada
- **Waxyaabaha Kale:** Sida ugu fiican ku dar jadwal ku saabsan goorta la sameeyay codsigii adeegyada soo kabashada iyo talaabooyinka degmada ee la qaaday markii la codsado.

Degmadu waa inay soo bandhigtaa dalab qoraal ah oo ah ee FAPE oo ay ku jirto wixii baahi ah ee adeegyada soo kabashada ah. Haddii waalidku diido IEP la soo jeediyay, ikhtiyaarrada adeegga soo kabashada, ama waqtiga, OSPI waxay ku talineysaa degmadu inay waalidiinta kala qaybqaato wadahalad in dib u eegis loo baahan yahay iyo in kale. Kooxaha IEP waa inay diiwaangeliyaan fikradaha waalidka ee go'aaminta baahida adeegyada soo kabashada, qorshaha la soo jeediyey ee ah in la bixiyo adeegyada, iyo haddii waalidku uusan ku raacsaneyn adeegyada la bixiyo. Haddii degmada iyo waalidku awoodi waayaan inay heshiis gaaraan, waalidku wuxuu heli karaa xulashooyinka xallinta khilaafaadka.

In kasta oo degmooyinka dugsiyadu ay bixinayeen waxbarasho gaar ah iyo adeegyo la xiriira intii lagu jiray cudurka safmark, qoysaska qaar ayaa diiday in ay helaan adeegyadaas sababo kala duwan awgood. Intaas waxaa sii dheer, qoysaska qaar waxay doorteen waxbarashada dhanka khadka markii ay degmadu bilowday bixinta waxbarashada la soo xaadirayo. Kooxaha IEP waa inay tixgeliyaan helitaanka iyo saameynta ardayga haddii adeegyada la siinayo aan la helin. Abaalmarinta waxbarasho ee magdhowga ah, garsoore sharciyeed ee maamulka ama OSPI wuxuu tixgelinayaa arrimo yareyn kara abaalmarinta magdhawga, sida diidmada qoysaska ee adeegyada la bixiyo. Si kastaba ha noqotee, OSPI waxay ku talineysaa in kooxda IEP ee ardayga ay weli tixgeliyaan baahida ardayga, saameynta COVID-19 ee ardayga, iyo inay gaarto go'aan shaqsiyeed, oo arday ku saleysan.

## Bixinta Adeegyada Soo kabashada

Kooxda IEP ayaa go'aamisa baahida ardayga ee adeegyada soo kabashada, oo ay ku jiraan jadwalka, waqtiga la filayo, meelaha adeegga, iyo xaddiga adeegyada. Dhowr arrimood ayaa saamayn ku yeelan doona goorta iyo sida degmo dugsiyeeka u jadwalayso una bixiso adeegyada soo kabashada, sida saamaynta ay ku yeelan karto qaddarka iyo nooca adeegyada soo kabashada ee caafimaadka iyo fayoobaanta ardayga, helitaanka shaqaalaha iyo gaadiidka, iyo tixgelinta bixinta adeegyada soo kabashada ku meelgaarka ah ee ardayda dugsiga barbaarinta iyo wixii ka dambeeya da'da 21.

### Jadwalka & Waqtiyada

Jadwalka iyo waqtiyada loogu talagalay adeegyada ka soo kabashada ayaa ah go'aanno shaqsiyeed, oo ku saleysan heerarka waxqabadka ee ardayga marka la barbar dhigo horumarka la filan lahaa haddii uusan cudurkan dilaacin, oo ay weheliso da'da ardayga, horumarkiisa, iyo meelaha uu u baahan yahay. Markasta oo ay suurtagal tahay, adeegyada ka soo kabashada waa inay ahaadaan kuwo loo dhan yahay oo la jaan qaada LRE-ga ardayga, haddii adeegyada la bixiyay waqti ka baxsan maalinta dugsiga ama inta lagu jiro dugsiga. (S&J B-5)

Adeegyada soo kabashada ee la bixin doono xagaaga, waxaa muhiim ah in la xasuusto in habka lagu ogaanayo baahida loo qabo adeegyada Sanad Dugsiyeedka La Kordhiyay (Extended School Year, ESY) ay tahay mid gooni ah oo ka baxsan go'aan kasta oo ku saabsan adeegyada ka soo kabashada ee loo bilaabay sababo la xiriira cudurka safmarka. (S&J B-4)

### Shaqaalaynta iyo Gaadiidka

OSPI waxay aqoonsan tahay in helitaanka shaqaalaha waxbarashada gaarka ahi ay tahay caqabad socota; tan waxaa ka mid ah helitaanka adeegyada soo kabashada ee ka baxsan maalinta dugsiga. Kooxaha IEP iyo iskuulada degmooyinku waxay muddo dheer hirgeliyeen ikhtiyaarro kala duwan oo adeegyo ah si ay u taageeraan marin u helidda waqti ku haboon oo dabacsan dhanka barayaasha gaarka ah waxaana lagu dhiirigelinayaa inay ballaariyaan xulashooyinkaan si ay u taageeraan marin u helidda adeegyada soo kabashada waqtiga ku habboon. Ikhtiyaarrada waxaa ka mid noqon kara qandaraasyo dheeri ah oo loogu talagalay shaqaalaha degmada dugsiga, qandaraas la qaadashada shaqaale shati ama shahaado haysta ama hay'ado kale oo waxbarasho, la shaqeynta shaqaalaha kale ee degmada dugsiga si loo bixiyo adeegyo dheeri ah iyada oo ay toos u kormeerayaan isla markaana ay la soconayaan shaqaalaha waxbarashada gaarka ah, iyadoo la kaashanaya degmooyinka iskuulka deriska ah iyo degmooyinka adeegga waxbarashada (Educational Service Districts, ESDs), iyo ku dhexgalka barashada soo kabashada oo leh nasasho gaagaaban.

Gaadiid ayaa laga yaabaa in loo baahdo in la siiyo ardayda si ay u helaan adeegyada soo kabashada ee ka baxsan maalinta dugsiga. Ikhtiyaarrada gaadiidka waxaa ka mid noqon kara gaadiidka degmada, gobollada, heshiisyada la wadaago, xulashooyinka gaadiidka gaarka loo leeyahay, ama u celinta waalidka kharashaadka safarka.<sup>14</sup> OSPI waxay aqoonsan tahay in ballaarinta adeegyada gaadiidka si loo helo marin u helida adeegyada soo kabashada ay noqon doonto caqabad socota waxayna ku talineysaa waxqabad hordhac ah iyo wada shaqeyn lagu xaliyo dhibaatooyinka kad dhaxeeya kooxaha IEP iyo waaxda gaadiidka deegaanka iyo gobolka.

### Adeegyada Soo kabashada Dugsiga Barbaarinta

Caruurta naafada ah ee dugsiga xannaanada waxaa laga yaabaa inay dareemaan la soo daahid dhanka adeegyada ah sababo la xiriira xirnaanshaha xarunta dugsiga iyo/ama dhibaatooyinka helitaanka fursadaha waxbarashada dhanka fogaanta ama khadka. Intaa waxaa sii dheer, "daryeelka hore iyo waxbarashadu waa qodob muhiim u ah awoodaha qoysaska si ay uga soo kabtaan dhaqaale ahaan masiibada waana lagama maarmaan in dib loo soo nooleeyo shaqaalaha dalka lana hubiyo in dhammaan waalidiinta iyo daryeelayaashu ay awoodaan inay ka qayb qaataan<sup>15</sup>". Adeegyada ka soo kabashada ee caruurta yaryar ee leh IEP waa in loo qaabeeyaa loona qorsheeyaa qaabab ku habboon koritaan ahaan. Tusaale ahaan, shaqaalaha degmada dugsiga ayaa laga yaabaa inay bixiyaan adeegyo soo kabashada dugsiga barbaarinta ah inta lagu jiro fasaxyada dugsiga ama waqti ka baxsan waxbarashada aasaasiga ah. Ardaydu

---

<sup>14</sup> [WAC 392-172A-02095](#)

<sup>15</sup> Uruka Qaranka ee Head Start (NHS). (2021). [Qorshaha Samatabbixinta Mareykanka: Isbedelka Siyaasadeed ee Saameynaya Qoysaska iyo Barnaamijyada Head Start](#) (p. 4).

waxay sidoo kale ka faa'iideysan karaan adeegyada soo kabashada dugsiga xannaanada iyo barbaarinta ee ay bixiso hay'ad qandaraas qaadatay ama iyada oo loo marayo barnaamijka carruurnimada hore ee ku saleysan bulshada (tusaale, Head Start, Barnaamijka Caawinta iyo Waxbarashada Caruurnimada Hore [Early Childhood Education and Assistance Program, ECEAP]). Adeegyada ka soo kabashada dugsiga barbaarinta waxaa ku jiri kara tikniyoolajiyad lagu taageerayo helitaanka waxbarashada fog, shaqaalaysiin, barnaamijyada xagaaga iyo dugsiga kadib, iyo taageerooyinka caruurta iyo qoysaska la soo derista hoy la'aanta.

## Adeegyada Soo kabsashada Kala Guurka ee Da'da 21 ka Weyn

Adeegyada soo kabashada kala guurka ah waa adeegyo kala guur oo dheeraad ah oo loogu talagalay ardayda leh Barnaamijyada Waxbarashada Gaarka ah (IEPs). Adeegyadan dheeriga ah waxay wax ka qaban karaan maqnaanta horumar macquul ah oo ku saabsan yoolalka IEP ama qorshaha kala guurka sababta oo ah maqnaanshaha ama xaddidnaanta waxbarashada gaarka ah iyo adeegyada la xiriira ama sababo kale awgood oo uu sabab u yahay cudurka safmarka ee COVID-19. Ardayda da'da kala guurka (guud ahaan da'da 16 illaa 21) ayaa laga yaabaa inay la soo derseen carqalad weyn oo dhanka waxbarashada shaqada ku salaysan ah iyo marin u helidda bulshada sababo la xiriira cudurka safmarka. Kooxaha IEP waa inay tixgeliyaan baahiyaha adeegga soo kabashada ee kala guurka ee dhammaan ardayda leh IEP ee da'daas ee sii dhiganya dugsiga.

Ardayda da'doodu u buuxsantay 21 jir inta lagu jiro cudurka safmarka ayaa sidoo kale u baahan kara adeegyada soo kabsashada kala guurka. Hay'ada Sharci dejinta Gobolka Washington waxay siisay maalgelin sanad dugsiyeedka 2021–22 iyo 2022–23 si ay u taageeraan adeegyada ka soo kabashada kala guurka ee ardayda da'doodu u buuxsantay 21 jir inta lagu jiro ama ka dib sanad dugsiyeedka 2019–20. Adeegyada dib u soo kabashada kala guurka waxaa lagu maalgelin karaa iyada oo la isku daro ilaha federaalka iyo gobolka. Maaddaama macluumaad maaliyadeed oo dheeri ah la helayo bogagga kala guurka ee Waxbarashada Gaarka ah ee COVID S&J iyo OSPI waa la cusbooneysiin doonaa.<sup>16</sup>

---

<sup>16</sup> Bogga [OSPI ee Kala Guurka Labaad \(Secondary Transition\)](#) waxaa lagu cusbooneysiin doonaa macluumaadka ugu dambeeyay ee ku saabsan adeegyada ka soo kabashada kala guurka, iyo dukumintiga Waxbarashada [Gaarka ah ee COVID S&J](#) ayaa sidoo kale hadda lagu cusbooneysiinyey adeegyada ka soo kabashada kala guurka (waxay noqon doontaa sheyga B-3).



## Macluumaad Dheeraad ah oo lagu Taageerayo Adeegyada Soo kabashada

- OSPI (2021). *Su'aalo iyo Jawaabo (Questions and Answers): Bixinta Adeegyada Ardayda Naafada ah inta lagu gudajiro COVID-19 ee Sanad Dugsiyeedka 2020–21* (Macluumaadka S&J - oo hada dib loo eegay) (Provision of Services to Students with Disabilities during COVID-19 in the 2020–21 School Year [Q&A Resource – currently under revision])
- OSPI (2020). *Dib U Furista Dugsiyada Washington 2020: Hanuuninta Waxbarashada Gaarka ah (Reopening Washington Schools 2020: Special Education Guidance)*
- OSPI (2020). *Dib U Furista Dugsiyada Washington 2020: Tilmaamaha Qorshaynta Waxbarashada Hore ee Degmada (Reopening Washington Schools 2020: District Early Learning Planning Guide)*
- [9 Talo Soo Jeedin ee ku saabsan Soo kabashada Waxbarashada Loo dhan yahay ee Ardayda Naafada ah](#)
- Xarunta Sinnaanta Qoka Waxbaranaya (2021). *Hirarka Soo Kacaya ee qaada Doomaha oo dhan: Maalgashiga Doolar-ka Dhiirrigelinta ee Diiradda Sinaanta*
- [Su'aala Soo Noq-noqda ee COPPA oo ku saabsan Waxbarashada Magdhowga ah ee xilliga COVID-19](#)
- [Tixgelinnada Adeegyada Soo kabashada \(Iowa\)](#)
- Golaha Saraakiisha Dugsiyada Sare ee Gobolka (Council of Chief State School Officers, CCSSO) (2020). *Dib U Bilaabidda iyo Soo kabashada: Tixgelinnada Waxbaridda iyo Barashada*
- Golaha Saraakiisha Dugsiyada Sare ee Gobolka (CCSSO) (2020). *Dib U Bilaabidda iyo Soo kabashada: Tixgelinnada Waxbaridda iyo Barashada: Soo kabashada Dugsiga Barbaarinta illaa iyo Fasalka 3aad ee Sannad Dugsiyeedka 2020–2021*
- Ururka Barnaamijka Caawinta Caruurta ee Qaranka (National Head Start Association, NHSA) (2021). *Qorshaha Samatabixinta Mareykanka: Isbedelka Siyaasadeed ee Saameynaya Qoysaska iyo Barnaamijyada Head Start*
- [Tixgelinnada Waaxda Waxbarashada ee Virginia ee Adeegyada Soo kabashada ee COVID ee Ardayda Naafada ah](#)
- [Xarunta Horumarka: Xaashida Macluumaadka IEP Waxay soo Badhigaysaa Heerarka Guulaha Waxbarashada Iyo Waxqabadka Shaqo](#)

## Lifaaqa: Korjoogteynta Horumarka (waa Furaha!)


Kormeerka horumarka waa qayb muhiim u ah go'aaminta baahida adeegyada soo kabashada iyo sida ugu wanaagsan ee loo bixiyo. Xogta la socoshada horumarka waxaa loo isticmaalaa in lagu go'aamiyo xaddiga ay ardaydu muujinayaan horumarka ku filan ee ku saabsan yoolalka IEP iyo sidoo kale waxaa loo isticmaali karaa in lagu qiyaaso heerarka horumarka (Rates Of Improvement, ROI), si la isu barbardhigo waxtarka noocyada kala duwan ee waxbaridda, iyo in la go'aamiyo goorta isbeddel waxbarasho loo baahan yahay si loo taageero ardayda si ay u gaaraan himilooyinkooda. Dhamaan meelaha loo baahan yahay, kooxaha IEP waa inay go'aamiyaan xadka ardayga iyo ROI-ga hadda jira si ay u go'aamiyaan adeegyada soo kabashada iyo isbeddelada waxbarista ee loogu baahan yahay ardayga si uu ugu sameeyo horumar macquul ah himilooyinkooda IEP. Waxqabadyada waa la xoojin karaa si loo kordhiyo heerka horumarka ardayga iyadoo la kordhinayo xoojinta, soo noqnoqoshada iyo/ama muddada adeegyada iyo taageerada la siinayo ardayga.

Waxaa jira habab dhowr ah oo kooxaha IEP ay u isticmaali karaan la socodka horumarka si loo go'aamiyo haddii ardaygu ka jawaabay faragelinta iyo in la qiimeeyo haddii ardaygu u baahan doono taageero dheeri ah ama isbeddello waxbaris si ay u gaaraan himilooyinkooda IEP. Iyadoo aan loo eegin habka la adeegsaday, yoolalka IEP waa inay had iyo jeer ku saleysnaadaan qiimeyn sax ah oo la isku halleyn karo, qiimeyn lagu ogaanayo waxa jira, la socoshada horumarka, iyo waxqabadyada (oo lagu bixiyo daacadnimo).

### Sawirida Xogta Kormeerida Horumarka

Hal hab oo ah korjoogteynta horumarka waxaa ka mid ah sameynta jaantus tilmaamaya heerka waxqabadka hadda ee ardayga (xadka) iyo bartilmaameedka mid kasta oo ka mid ah yoolalka IEP ee ardayga. Labadan qodob waa la isku xiraa si ay u sameeyaan xariiq hadaf oo matalaya horumarka ardayga laga filayo inuu sameeyo mudada sanadlaha ah ee IEP ee loo qaybiyay mudooyinka warbixinnada horumarka (tusaale, rubuc ama seddex bilood). Kooxaha IEP ayaa markaa sawiri kara cabirrada soo noqnoqda ee la socodka horumarka si loo go'aamiyo in ardaygu ku socdo dariiqa uu ku gaarayo himilooyinkooda.

Marka kooxaha IEP ay dib u eegaan xogta horumarka ardayga, shaxdan soo socota ee ay soo saartay Xarunta IRIS<sup>17</sup> ayaa tusaale u ah waxa ay kooxdu dib u eegi karto:



<sup>17</sup> Isha: XARUNTA IRIS (2021). [Kormeerka Horumarka: Akhriska](#).

**Nidaamkani wuxuu bixiyaa muuqaal si looga caawiyo kooxda IEP inay go'aansadaan inay dib u kulmaan si wax looga qabto tabashooyinka iyo/ama la'aanta horumarka laga filayay:**

- Haddii inta badan dhibcaha xogta ay ku yaalliin xariiqda yoolka, tani waxay muujineysaa in ardaygu ku socdo waddadii uu ku gaari lahaa yoolka.
- Haddii inta badan dhibcaha xogta ay ka hooseeyaan xariiqda yoolka, tani waxay muujineysaa in ardaygu uusan sameynaynin horumar ku filan iyo in loo baahan yahay in la beddelo waxbarista.
- Haddii inta badan dhibcaha xogta ay ka sareeyaan xariiqda, tani waxay muujineysaa in waxqabadka ardaygu uu ka badan yahay filashooyinka iyo in loo baahanyahay yool ka sii adag.
- Dugsiyada qaarkood waxay u isticmaali karaan barnaamijyada softiweerka ee leh agabyada lagu meeleeeyay, Excel ama shaxanka qalinka ee warqada si ay ugu muujiyaan xogta la socodka horumarka ardayda

**Macluumaadka Korjoogteynta Horumarka**

Si aad wax badan uga ogaato qaababkan kormeerka horumarka, fadlan dib u eeg ilaha soo socda:

- Xarunta Qaranka ee Ka Hortagga Faragalinta Qotada Dheer (National Center on Intensive Intervention, NCII) ee Machadka Cilmi Baarista Mareykanka (American Institute for Research):
  - [Adeegsiga Kormeerka Horumarka Waxbarashada ee Qorshaynta Waxbarida Gaarka ah \(Shaqsiyaysiinta Ku Saleysan Xogta \[Data-based Individualization, DBI\] ee Taxanaha Waxbarashada Xirfadeed Qaybta 2\)](#)
  - [deegsiga Kormeerka Horumarka Waxbarashada ee Qorshaynta Waxbarida Gaarka ah](#)
  - [Dulmarka Xeeladaha Dejinta Yoolalka Waxbarashada](#)
- Xarunta IRIS: [Qaybta Kormeerka Horumarka](#)
- Xarunta horumarka: [Macluumaadka loogu talagalay Barayaasha iyo Kuwa Bixiya Adeegyada La xiriira](#)